



Kaupunki jakaa lounaspaketteja
esiopetuksen ja peruskoulun
etäopetuksessa oleville lapsille ja
nuorille

31.03.2020

Magaaladu waxaa ay u qaybinaysaa baakad cunto ku jirto ardayda waxbarashada hore, iyo carruurta iyo dhalinyarada dugsiga hoose dhexe ee waxbarashada ku qaadanaya dhanka internetka.

Magaalada Vantaa waxaa laga bilaabo 2.4 ay u qaybinaysaa baakad cunto ku jirto ardayda wax ku barata dhanka internetka ee ku jira waxbarashada hore iyo ardayda dugsiga hoose dhexe. Baakadka cuntada ah ee la qaybinaayo, waxaa loogu talagalay qoysaska u arka in ay u baahan yihiin. Waalidku waxaa ay ka soo doonan karaan baakadka cuntada ah goobaha lagu qaybiyo laba goor toddobaadkiiba, Talaadooyinka iyo khamiisaha saacadda 15.00-17.30.

Baakadaha cuntada waxaa lagu qaybinayaa goobaha soo socda: dugisga sare ee Sotungin, dugsiga sare ee Tikkurila, dugsiga sare ee Lumo, xarunta Varia ee ku taalla Talvikkitie, xarunta Varia ee ku taalla Rälssitie, dugsiga sare ee Vaskivuori, iskuulka Länsimäki, Iskuulka Aurinkokivi iyo xrunta dhalinyarada ee pähkinärinne, qaybta naadiga galabnimada. Cinwaannada goobahaas cuntada lagu qaybinayo, waxaa ay ku qoran yihiin dhammaadka farriintaan.

Nooca cunta waa mid maalinwalba isbeddelaysa, waxaan ka xunnahay in dadka cuntooyinka gaarka ah cuna aan si gaar tixgelin loo siin karin.

Waalidku marka uu cuntada soo doonanaayo, wuxuu sheegayaa xannaanada uu ilmuhu dhigto iyo iskuulka ardayga dhalinyarada ah uu ka tirsan yahay. Cunto qaybintaas uma baahna in aad hore isu soo diiwaan gelisaan. Waxaan u diyaarin doonaa arrinkaa, in qaybintu ay noqoto mid aan u baahnaanayn in saf la galo. Ha soo doonan cuntada la qaybinaayo haddii astaamihii hargabka aad leedahay.

Ardayda goobaha waxbarashada ku sugan waxaa iyaga sidii hore oo kale cuntada laga siinayaa goobta waxbarashada hore ama iskuulka ay dhigtaan. Ardayda wax ku barata dhanka internetka ee aan joogin goobta waxbarashada, iyaga lama siinaayo cunto diirran, waayo cuntadaas waxaa ay ka helayaan gurigooda.

Goobaha cuntada lagu qaybinaayo:

Dugsiga sare ee Sotungin

Sotungintie 19, 01200 Vantaa

Dugsiga sare ee Tikkurila

Valkoisenlähteentie 53, 01370 Vantaa

Dugsiga sare ee Lumo

Urpiaisentie 14, 01450 Vantaa

Dugsiga sare ee Vaskivuori

Virtatie 4, 01600 Vantaa

Xarunta Varia ee Talvikkitie

Talvikkitie 119, 01360 Vantaa



Kaupunki jakaa lounaspaketteja
esiopetuksen ja peruskoulun
etäopetuksessa oleville lapsille ja
nuorille

31.03.2020

Xarunta Varia ee Rälssitie

Rälssitie 13, 01530 Vantaa

Iskuulka Länsimäki

Pallastunturintie 27, 01280 Vantaa

Iskuulka Aurinkokivi

Aurinkokivenkuja 1, 01700 Vantaa

Xarunta dhalinyarada ee Pähkinärinne , qaybta naadiga galabnimada

Mantelikuja 4, 01710 Vantaa